

Farriin daryeele 7.5.

Kusoo dhawoow waxbarashada lagu qaadanayo dugsiga laga billaabo 14.5.

Muddada ka harsan waxbarashada lagu qaadanayo dugsiga ee guga, waa muhiim marka laga eego dhinaca fayo-qabka iyo xiriirrada arrimaha bulshada ee ardayda. Muddada ay guriga wax ku baranayaan ayaa waxaa ardayda loo sii diyaarinayaa in ay dugsiga kusoo laabtaan. Waxaa ayadoo ardayda lala kaashanayo qiimeyn lagu sameynayaa muddadii ay guriga wax ku baranayeen, ayadoo loo qabanayo ballan wadajir ah oo looga sheekeysano hababka hawlaha isbedbedelaya ee dugsiga iyo waxa ay ardaydu dareemayaan.

Waxay Vantaa ku dhaqmeysaa siyaasadda ay dowladdu dejisay ee ah in dugsiyada hoose/dhexe lagu laabto laga billaabo 14.5.2020. Sida ay dowladdu go'aamisay waxaa ammaan ah in laga qeybgalo waxbarashada lagu qabanayo dugsiga, ayadoo la adeegsanayo shuruudaha loo dejiyey nadaafadda iyo ku dhaqmidda waxyaabaha la xiriira qaabeynta waxbarashada.

Qaabeynta waxbarashada

Waxaa waxbarashada lagu hirgelinayaa qaabeynta waxbarasho ee ugu dabacsan. Meelaha ay ardaydu wax ku bartaan waxaa lagu xallinayaa ayadoo la hirgelinayo arrinta ah in hal goob ardayda joogta laga yareeyo sidii hore, taasoo uu macnaheedu yahay in masaafada jir ahaaneed ee u dhexeysa ardayda dhexdooda iyo macallinkaba la kordhiyo. Kooxaha waxbarashada meelo kala duwan ayaa lagu kala haynayaa xilliga waxbarashada ee maalintii oo dhan.

Dhammaan dugsiyadu wey shaqeynayaan islamarkaasna waxbaa lagu baranayaa, waxayna ku dhaqmayaan tilmaamaha nabadgelyada ee guud, ayadoo laga fogaanayo xiriirka jir ahaaneed ee aan loo baahneyn. Fasallada iyo meelaha wax lagu barto ee dugsiga waxaa ka dheeri ah in ay ardayda qaarkood wax ku baranayaan fasallada dugsiyada waxbarashada heerka labaad iyo qolalka dhismayaasha ay dhallinyaradu isugu timaaddo ee dugsiga u dhow. Sidaas waxaan ku helnay waasac iyo nafis dheeri ah oo fasallada dugsiga kusoo kordhay.

Carruurta iyo dadka waaweyniba waxay dhaqayaan gacmahooda markasta oo ay dugsiga yimaadaan, iyo kahor inta aysan guriga aadin. Waxaa intaas ka dheeri ah in gacmaha la dhaqayo inta aan la cunteynin kahor, iyo mar walba oo bannaanka laga yimaado oo gudaha lasoo galayo, iyo weliba markasta oo la hindhiso ama la qufaco kadib, ama markii ay gacmuhu si muuqata u wasaqeysan yihiin. Waxaa gacmaha lagu qallajinayaa warqado hal mar la isticmaalo oo shukumaan gacanta lagu qallajiyo ah.

Raashin cunidda dugsiga waxaa lagu qabanqaabinayaa ardayda fasalkooda ama kooxdooda, ayadoo taxaddar gooni ah la siinayo nadaafadda. Marka uu fasal wax cuno inta uusan fasalka kale soo gelin waxaa la tirtirayaa meeshaa ay cuntada ka qaadanayeen, waxaa la bedelayaa waxyaabihii cuntada lagu guranayey, ayadoo jeermis-dilid lagu sameynayo meelaha laga qaadanayey cabitaannada.

[Ka qeybgelidda ardayga ee waxbarashada](#)

Ardaygu waa in uu ka qeybgalaa waxbarashada, haddii aysan jirin sabab asaga u gaar ah oo si ku-meel gaar ah loo siiyey fasax uu uga maqnaanayo waxbarashada dugsiga.

Lama imaan karo dugsiga ayadoo la xanuunsan yahay

Ma loo baahna in uu dugsiga yimaado ilmo ama qof weyn oo xanuunsan, haddii ay jiraan wax calaamad ah oo muujinaya in uu asagu xanuunsan yahay. Haddii uu ilmuhu xanuunsado xilliga maalinimada ah, waxaa ilmaha lagu arkay calaamadda islamarkiiba loo wareejinayaa meel gooni ah,

ayadoo uu la socdo qof weyn si uu halkaas ugu sugo waalidka. Dadka calaamadaha isku arkay waa in ay la xiriiraan xaruntooda caafimaadka, islamarkaasna ay dalbadaan in lagu sameeyo baaritaanka caabuqa koroonaha, ayadoo raacaya tilmaamaha ay siisay xarunta caafimaadku.

Haddii uu ilmuhu ka mid noqdo dadka khatarta ku jira marka laga eego dhinaca caabuqa koroonaha

Wadashaqeyn ay sameeyeen isbitaallada jaamacadda iyo waaxda caafiimaadka iyo fayo-qabka ee loo soo gabiyo THL ayaa waxay ku dejiyeen liiska cudurrada, kuwaas oo loo arko in carruurta qabtaa ay khatar ugu jiraan in ay u jirraadaan cudurro uu nuucoodu halis yahay, marka ay qaadaan caabuqa koroonaha. Wixii faahfaahin ah oo dheeri ah oo ku saabsan dadka khatarta ku jira waxaad ka heli kartaa halkaan [linkistä: https://www.hus.fi/hus-tietoa/ uutishuone/Sivut/Yliopistosairaalat-antoivat-ohjeen-lasten-koronaviruksen-riskiryhmist%C3%A4.aspx](https://www.hus.fi/hus-tietoa/ uutishuone/Sivut/Yliopistosairaalat-antoivat-ohjeen-lasten-koronaviruksen-riskiryhmist%C3%A4.aspx).

Haddii ilmahaaga lagu daaweynayey isbitaallada Helsinki iyo hareeraheeda ee loo soo gaabiyo HUS, cudurrada aan kor kusoo xusnay dartood, waxaan markaas kaa codsaneynaa in aad dugsiga keentid warqad dhakhtareed oo ay qortay qeybtii ilmahaaga ku daaweyneysay Hus.

Haddii uusan ilmuhu laheyn xannibaado hore oo la xiriira waxbarashada lagu qaadanayo dugsiga, xilligii lagu jiray hargabka daran ee qaboobaha ama caabuqa asiiba hab-dhiska neefsashada ee loo soo gaabiyo, markaas majirto sabab uu uga maqnaado dugsiga xitaa xilliga lagu jiro safmarka koroonaha.

Ardayga dugsiga uga maqan in uu ka tirsan yahay dadka khatarta ku jira darteed, waxaa loo sameynayaa go'aanka qaabeynta waxbarashada ee gaarka ah sida uu dhigayo xeerka waxbarashada ee aasaasiga ah §18, ayadoo uu markaas ardaygu xaq u leeyahay waxbarashada guriga lagu qaadanayo midda ugu habboon. Xaaladda nuucaas ooo kale ah waa in uu daryeeluhu lasoo xiriiraa maamulaha dugsiga si looga heshiiyo qaabeynta waxbarashada.

Haddii ardayga qoyskiisa uu ka mid yahay xubin ka mid ah dadka khatarta ku jira

Waxay THL dejisay liiska cudurrada [listan \(https://thl.fi/fi/web/infektioaudit-ja-rokotukset/taudit-ja-torjunta/taudit-ja-taudinaiheuttajat-a-o/koronavirus-covid-19/vakavan-koronavirustaudin-riskiryhmat\)](https://thl.fi/fi/web/infektioaudit-ja-rokotukset/taudit-ja-torjunta/taudit-ja-taudinaiheuttajat-a-o/koronavirus-covid-19/vakavan-koronavirustaudin-riskiryhmat), kuwaas oo dadka waaweyn kusii kordhinaya halista caabuqa koroonaha. Cudurrada sida weyn u daciifinaya shaqada sambabada ama wadnaha ama awoodda difaaca ee xubnaha jirka, waxaa tusaale ahaan ka mid ah kuwaan:

- Jirrada wadnaha ee uu heerkeedu daran yahay
- Jirrada sambabada ee aysan daaweynteedu fadhinin
- Sokorta oo ay la xiriirto dhaawac ay u geysatay xubin jirka ka mid ah
- Jirro raagtay oo beerka ku dhacday ama kilyaha oo aan si wanaagsan u shaqeyneynin
- Cudurrada daciifiya awoodda difaaca jirka sida kaankarada firfircoon ee ay socoto daaweyntiisa unugyada loo marsiinayo
- Daawada sida daran u daciifineysa awoodda difaaca jirka (tusaale ahaan daawo xad-dhaaf ah oo loo qaato burooyinka jirka ama madaxa gudhiisa kasoo baxa).

Haddii xubin ka mid qoyska ardayga dugsileyda ahi uu qabo xanuunnadan kor lagu soo sheegay islamarkaasna uu daryeeluhu doonayo in sababtaas darteed uusan ardaygu ka qeyb qaadaneynin waxbarashada dugsiga lagu qaadanayo, wuxuu markaas daryeeluhu arrintaas ka dalban karaa shahaado ama warqad. Waxaad warqadda ka heli kartaa adigoo la xiriiraya qeybta lagu daaweynayey ee Hus ama xarunta caafimaadka ee Vantaa. Dadka lagu daaweeyey xarunta caafimaadka ee Vantaa, waxay kala xiriiri karaan ayagoo adeegsanaya barnaamijka danabeysan ama elektarooniga ah ee macaamiisha loogu talo galay ee loo yaqaanno Maisa. Waxaad halkaan ka heleysaa lifaaqa barnaamijka Maisa [linkki: https://www.maisa.fi/maisa/Authentication/Login?](https://www.maisa.fi/maisa/Authentication/Login?)

Farriimaha lagu soo dirayo Maisa waa in lagu soo qoraa macluumaadka soo socda: A) Waxaan u baahanahay warqada ama shahaado loo qoro ilmahayga oo dugsiga la geeyo. B) Sheeg xubinta qoyska ka midka ah ee aad adigu tahay / waa kee ilmaha da'yarta ah ee qoyska ka midka ah ee aad arrintiisa ka shaqeyneysid . C) Muxuu yahay cudurka sababtiisa loo codsanayo shahaadada.

Shahaadada aad dugsiga daraadiis u dalbatay waxaad ka heleysaa barnaamijka Maisa.

Marka uu ardaygu dugsiga uga maqan yahay qof qoyskiisa ka mid ah oo ka mid ah dadka khatarta ku jira darteed, waxaa markaas ardayga maqan loo sameynayaa go'aanka qabanqaabada waxbarashada ee gaarka ah sida uu dhigayo xeerka waxbarashada aasaasiga ah \$18 ayadoo uu markaas ardaygu xaq u leeyahay waxbarashada guriga lagu qaadanayo midda ugu habboon. Xaaladda nuucaas oo kale ah waa in uu daryeeluhu lasoo xiriiira maamulaha dugsiga si looga heshiiyo qaabeynta waxbarashada

Ka-maqaanshada dugsiga ee kale

Haddii loo baahdo ogolaanshaha ka-maqaanshada dugsiga, waa in mar walba loo dalbadaa qaab-dhaqankii caadiga ahaa ee fasaxa loo dalban jray. Marka loosoo wareego waxbarashada lagu qaadanayo dugsiga kadib ardayda maqan mar dambe looma qabanqaabinayo waxbarasho ay ku qaataan guriga.

Gaadiidka dugsiga

Marka ay dugsiyadu furmaan 14.5. waxaa sii soconaya gaadiidka dugsiga ee ardayda qaada sida ku qoran go'aammada hadda shaqeynaya. Waxay dugsiyadu shirkadaha tagsiyada ku wargelinayaan jadwalka waxbarashada ee ardayda iyo weliba goobta lagu diyaarinayo waxbarashada, haddii ay arrimahaasi ku yimaadaan isbedello. Waxay sidii caadiga aheyd shirkadaha tagsiyadu daryeelayaasha ku wargelinayaan saacadaha uu gaadiidku imaanayo.

Sidii horey caadada u aheyd waa in ay daryeelayaashu baajiyaan gaadiidka tagsiga, ayagoo si toos ah ugu wargelinaya shirkadaha tagsiyada, haddii uu ardaygu ka-maqaanayo dugsiga.

Khadka ay ku socdaan gaadiidka dadweynaha waxaa ku yimid isbedello muddadii lagu guda jiray xilliga guga. Haddii ardayga la siiyey kaarka safarka ee loogu talagalay ardayga, waxaa markaas muhiim ah in xilli hore la baaro safarka dugsiga, ayadoo la isticmaalayo gaadiidka dadweynaha.

Hawlaha loo sameeyo ardayda xilligga subaxda iyo galabta ah

Hawlaha loo sameeyo ardayda xilliyada subaxda iyo galabta ah waxay labada todobaad ee ugu dambaysay u soconayaan sidii caadiga aheyd. Haddii uu ilmahaagu sannadkaan haystay go'aanka hawlaha ardayda loo sameeyo galabtii, islamarkaasna aad u baahan tahay xannaano, waxaad markaas si toos ah ula soo xiriireysaa qeybta u qabanqaabisa hawlaha ardayda loo sameeyo galabtii ee dugsiga uu dhigto ilmahaagu.

Meelaha lagu qabto hawlaha ardayda loo sameeyo galabtii, waxaa dhici karta in ay joogaan arday ka kala socota kooxo ama fasallo kala duwan. Waxaa goobahaas la isugu imaanayo lagu dhaqmayaa in lakala fogaado.

Adeegyada shaqaalaha kala qaabilsan arrimaha ardayda iyo cilmi-nafsiga

Adeegyada shaqaalaha kala qaabilsan arrimaha ardayda iyo cilmi-nafsiga waa kuwo diyaar u ah ardayda, daryeelayaasha iyo weliba shaqaalaha dugsiga. Arrinta sida gaarka ah muhiimka u ahi waxay tahay in ardayda, daryeelayaasha iyo macallimiintuba ay wixii welwel ah ee jira ay ayagoo aan dhib badan u marin ay sahlan ugala hadlaan shaqaalaha qaabilsan daryeelka ardayga. Shaqaalaha

kala qaabilsan cilmi-nafsiga iyo arrimaha dhibaatooyinka ardaydu waxay diiradda saaranayaan la kulmida ardayda iyo in ay macallimiinta ku caawiyaan shaqadooda. Waxbarashada aasaasiga ah waxaa lagu hawlgelayaa ayaga dugsiyadooda. Waxay ujeeddadu tahay in loo diyaariyo caawimaad dhammaan ardayda ay macallimiintoodu ama daryeeyaashoodu ama ardayda laftiisu ay welwelka qabaan. Dadka ka shaqeeya dugsiyada, carruurta, dhallinyarada iyo qoysaskuba waxay haddii loo baahdo lasoo xiriiri karaan dadka kala qaabilsan arrimaha dhibaatooyinka haysata ardayda iyo cilmi-nafsiga ee dugsigooda, ayagoo adeegsanya Wilma-da ama taleefanka kasoo wacaya. Qofka qaabilsan cilmi-nafsiga iyo qofka qaabilsan arrimaha dhibaatooyinka haysta ardayda waxay sii wadayaan hawsha ay la wadaan ardayda xitaa bisha Juun, ayagoo shaqooyinkooda kusoo laabanaya horraanta bisha Agoosto.

Waxay dugsiyadu warbixinno faahfaahsan kasoo sameynayaan sida hawlaha loo qabanqaabinayo

Waxaa dugsiyada lagu sameynayaa qaabab uu dugsi walbaa wax u diyaarsanayo. Xilliyada ay dugsiyadu billaabanayaan iyo sida ay fasallada u habeynayaanba waxaa k uimaan kara isbedello. Waxay dugsiyadu maalmaha soo socda waaliddiinta siin doonaan warbixin faahfaahsan oo ku saabsan qaabka loo qabanqaabinayo waxbarashada, ugu dambeyn 12.5.

Wixii intaas ka dheeri ah ee ku saabsan kusoo laabashada waxbarashada lagu qaadanayo dugsiyada waxaad ka akhrin kartaa bogga ay Internet-ka ku leeyihiin qeybta waxbarashadu: <https://www.oph.fi/fi/koulutus-ja-tutkinnot/145-alkaen-lahiovetukseen-palaaminen-perusopetuksessa>

Mar haddii uu sannad-dugsiyeedkii sii dhammaanayo, waxaan rajeyneynaa in aad awood u yeelataan inta ka dhimman. Arrintaan si wadajir ah ayaan uga bixi karnaa!
Ilkka Kalo, madaxa waxbarashada aasaasiga ah ee Afka-Finishka
Anders Vikström, madaxa deegaan-adeegga Afka-Swiidhishka